


IVP (Intravenous Pyelogram)

IVP is a test to check for kidney stones or other diseases of the kidneys and bladder. X-rays are done after dye is given.

If you have any allergies to medicines, foods or other things, tell the staff before the test.

If you are pregnant, or think you might be, talk to the staff before the test.

Arrive on time for your test. Plan to be here for about 2 hours. The test takes about 1 hour.




IVP (Pyelogram-ka Xididka)

IVP waa baaritaan lagu hubinayo dhagax kellida galay ama cudurrada kale ee kelyaha iyo kaadi haysta. Raajo ayaa la isa saaraa marka rinji la isa siiyo ka dib.

Hadii aad wax xajiin ah ka qaaddo daawooyinka, cuntooyinka ama waxyaabo kale, shaqaalaha u sheeg baaritaanka ka hor.

Hadii aad uur leedahay, ama aad u maleyneyso in aad yeelanayso, shaqaalaha la hadal baaritaanka ka hor.

Baaritaanka waqtiga ku imow. Sii qorsheyso in aad halkaan joogeysa ilaa 2 saacadood. Baaritaanku wuxuu qaadanayaa ilaa 1 saac.



IVP (Intravenous Pyelogram). Somali.

To Prepare

- Tell your doctor if you have asthma or a dye allergy.
- Buy a Fleet enema from your local drug store.
- The day before your test, drink plenty of liquids.
- Do not eat or drink anything, including water, after midnight before the test.

The Morning of Your Test

You need to clear the stool from your bowel before this test. Use the enema 2 hours before your test.

To use the enema:

1. Shake the bottle.
2. Remove the orange plastic cover on the tip of the bottle.
3. Lie on your left side with your right knee bent and your arms relaxed.
4. Gently put the bottle tip into your rectum. Push as if you are having a bowel movement. This will relax the muscles so that the tip goes in easier.
5. Stop pushing and take slow, deep breaths.
6. Squeeze the bottle until most of the liquid is in your rectum.
7. Remove the tip from your rectum. Lie on you left side and squeeze your buttocks to hold the liquid in your rectum.
8. You will have a strong urge to have a bowel movement in about 5 minutes. Hold the liquid in as long as you can.
9. Use the toilet.
10. Wash your hands with soap and water.

Si aad isu Diyaariso

- Takhtarkaaga u sheeg hadii aad neef ama asma qabto ama aad rinjiga xajiin ka qaadayso.
- Ka soo iibso farmashiyaha xaafadda biyaha caloosha Fleet lagu soo faaruqiyo kahor qalniinka.
- Maalinta baaritaankaaga ka horreysa, cab cabitaanno fara badan.
- Waxna ha cunin waxna ha cabbin, marka lagu daro biyo, wixii ka danbeeya saqda dhexe ee habeenka baaritaanka ka horreeya.

Subaxda Baaritaankaaga

Waxaad u baahan tahay in aad iska soo dhammeyso saxarada baaritaanka ka hor. Enema-da isticmaala 2 saacadood baaritaanka ka hor.

Si aad u isticmaasho enema:

1. Dhalada rux.
2. Daboolka casaanka ah ka qaad dhalada afkeeda kore.
3. Dhinaca bidix u seexo adigoo jilbaha soo laabaya gacmahana kala bixinaya.
4. Si tartiib ah dhalada malawadka isaga geli. Riix sidii adigoo saxaroonaya oo kale. Taasi waxay dabcineysaa murqaha si markaas afku uu si fudud gudaha ugu galo.
5. Jooji riixidda ka dibna qaado neef tartiib ah, oo qoto dheer.
6. Dhalada majuuji ilaa dareeraha dhalada intiisa badan ay malawadkaaga galaan.
7. Afka dhalada ka soo saar malawadka. Dhinaca bidix u seexo ka dibna badhidaada majuuji si aad dareeraha malawadka ugu celiso.
8. Waxaa si daran kuu qaban doona saxaro muddo 5 daqiiqadood ah. Isku celi ilaa iyo inta aad awooddo.
9. Musqusha isticmaal.
10. Gacmaha saabbuun iyo biyo isaga dhaq.

IVP (Intravenous Pyelogram). Somali.

During the Test

- You will wear a hospital gown.
- An IV (intravenous) is put in a vein in your arm.
- You lie on an x-ray table. You need to be still during the x-rays.
- You are given dye in your IV line. The dye lets your kidneys and bladder show on the x-rays. You may get a metal taste in your mouth or a warm feeling in your body when the dye is given. Tell the staff if you have any strange feelings.
- The dye moves to your kidneys and bladder.
- You may be helped to the toilet to empty your bladder. The dye is clear, so you should not see a color change in your urine.
- X-rays are taken. You may need to wait while your x-rays are checked.

After the Test

- Test results are sent to your doctor. Your doctor will share the results with you.
- Drink plenty of liquids for the next two days to get rid of the dye in your body.
- Do not take the medicine metformin (Glucophage) for 2 days after the test.

Talk to your doctor or nurse if you have any questions or concerns.

Waqtiga Baaritaanka

- Waxaad xiran doontaa marada isbitaalka.
- IV (xidid gale) ayaa xididka gacanta lagaa gelin doonaa.
- Waxaa ku seexanaysaa miiska raajada. Waxaa lagaa rabaa in aadan dhaqaaqin waqtiga raajada lagaa qaadayo.
- Waxaa lagu siinayaa khadka IV-ga lagugu siinayaa rinji. Rinjiga wuxuu kelyahaaga iyo kaadi haysta ku muujinayaa raajada. Waxaa laga yaabaa in afka bir dhandhankiisa aad dareento ama dareen diirraan ah ee jidhkaaga marka rinjiga lagu siiyo. Shaqaalaha u sheeg haddii aad dareen daran isku aragto.
- Rinjiga wuxuu galayaa kelyahaaga iyo kaadi haysta.
- Waxaa laga yaabaa in lagaa caawiyo musqul gelidda si aad kaadida isaga soo dhammeyso. Rinjiga waa cad yahay, markaas ma ahan in aad isku aragto midab beddelmay ee kaadida.
- Raajooyin ayaa lagu saarayaa. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad sugto inta raajada laga hubinayo.

Baaritaanka ka Dib

- Natiijooyinka baaritaanka waxaa loo diraa takhtarkaaga. Takhtarkaaga ayaa kaala hadli doona natiijooyinka.
- Cab cabitaanno fara badan labada maalmood ee ku xigta baaritaanka si aad rinjiga jidhkaaga uga soo saarto.
- Ha qaadannin daawada Metformin (Glucophage) ilaa 2 maalmood oo baaritaanka danbeysa.

La hadal takhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad wax su'aalo ama walaac ah qabtid.

2005 – 2/2011 Health Information Translations

Unless otherwise stated, user may print or download information from www.healthinfotranslations.org for personal, non-commercial use only. The medical information found on this website should not be used in place of a consultation with your doctor or other health care provider. You should always seek the advice of your doctor or other qualified health care provider before you start or stop any treatment or with any questions you may have about a medical condition. The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System, OhioHealth and Nationwide Children's Hospital are not responsible for injuries or damages you may incur as a result of your stopping medical treatment or your failure to obtain medical treatment.

IVP (Intravenous Pyelogram). Somali.